



Ref: XRW/OM/PR 00106/11/11

Date: November 26, 2011

**Wafdi heer sare ah oo uu hoggaaminayo Ra'iisul Wasaare Ku xigeenka
Dalka Turkiga oo Muqdisho soo gaaray maanta**

Muqdisho, Sabti November 24, 2011----Wafdi heer sare ah oo uu hoggaaminayo Ra'iisul Wasaare Ku Xigeenka Turkiga Sayn Bekir Bozdag ayaa maanta soo gaaray Muqdisho. Wafdigani heerka sare ah waxaa ka mid ah Safiirka Turkiga ee Soomaaliya Dr Kani Torun, Guddoomiyaha Guddiga Baarlamaanka ee Caafimaadka, Cevdet Erdol, Xubno baarlamaanka Turkiga ah sida Sayn Huseyin Tanriverdi, Sayn Selcuk Ozdag, Muzaffer Yurttas, Wasiir ku xigeenka Caafimaadka Turkiga Sayn Prof Dr. Nihat Tosun, Guddoomiyaha Hay'ada Horumarinta caalmiga ee TIKA, Sayn Dr Serdar Cam, Guddoomiyaha Hay'ada kale ee TOKI, la taliyeyaa, agaasime kuxigeenada wasaaradaha Turkiga, saraakiil ka socotay dowladda hoose ee Istanbul, khubaro iyo ganasatayaal Turki ah. Sidoo kale wafdigaa waxaa la socday Safiirka Soomaaliya u fadhiya Turkiga Nur Sheikh Hamud.

Wafdigani heer sare ah loogu soo dhoweeyey garoonka Caalamiga ah ee Aden Adde oo uu halkaas ku soo dhoweeyey Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Prof Abdiweli Mohamed Ali, golaha wasiirada, Guddoomiyaha Gobolka Banaadir iyo mas'uuliyiin kale. Soo dhoweynta ka dib Ra'iisul Wasaare Ku xigeenka Turkiga waxuu dhagax dhigay garoonka diyaaradaha ee Caalamiga ah ee Aden Adde, oo Turkigu uu ka bilaabo doono hirgalinta mashaariicda ay ka mid yihiin Tower cusub oo ku qalabeysan qalab casri ah, terminal cusub, iyo gidaarka amniga ee Garoonka iwm.

Wagdigu waxey kaloo tageen xarunta Hay'ada TIKA ay ku leedahay Muqdisho, ka dibna waxey wafdigaa la qaateen kulan dheer Ra'iisul Wasaaraha iyo golahiisa wasiirada, kulankan oo ka dhacay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya. Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Prof Abdiweli Mohamed Ali oo furay shirkan labo geesoodka ah ayaa u mahadceliyey Dowladda Turkiga oo uu sheegay in shacabka u soo gurmatay waqtii xasaasi ah oo abaaro ba'an ay dalka ka jireen. Imaatinkii Ra'iisul Wasaaraha Turkigana waxuu indhaha u furay caalamka intiisa kale oo ka sii jeeday arrimaha Somalia.

Ra'iisul Wasaare ku xigeenka Turkiga Bekir Bozdag ayaa sheegay in Dowladda iyo shacabka Turkigaba ay ka go'antahay gacansiinta Dowladda iyo shacabka Soomaaliyeed una yimid inuu kormeer ku sameeyo mashaariicda laga fulinayo Muqdisho, waxuuna sheegay in ay garoonka diyaaradaha ka fulin doonaan Tower cusub, Terminal cusub iyo darbiga amniga iyo howlo kale. Sidoo kale Ra'iisul Wasaare ku xigeenka waxuu sheegay inay Isbitaal cusub oo 200 sariir qaada ka hirgelinayaagagaarka Digfeer oo ay la socdaan Masaajid iyo 2 Iskuul. Sidoo kale waddada Makka Al-Mukara ilaa iyo airportka in qandaraaska

howshiisa ay bilaabatay lana hirgelin doono dhowaan. Sidoo kale Clinic ay horey u fureen, haddana mid kale la howlgelin doono berry. Waxaa kaloo jiro mashaariic kale oo horumarineed oo ay Turkigu damacsanyihiin. Waxuu kaluu sheegay inay soo socdaa gaadiidka qashanka lagu qaado iyo dhammaan tasiilaadkii saacidi lahaa maamulka Muqdisho inay nadaafadda ka howlgalaan isagoo sheegay in Dowladda Hoose ee Istanbul ay diyaar u tahay inay la shaqeyso maamulka Gobolka Banadir.

Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya ayaa ku wareejiyey Ra'iisul Wasaare Ku xigeenka Turkiga mashaariic hor leh oo ay Dowladda Soomaaliya u aragto kuwo muhiim ah sida hay'adaha kaabayaasha dhaqaalaha, dib-u-heshiisiinta, Dastuur sameynta iyo howlo kale oo muhiim u ah Shacabka Soomaaliyeed.

Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya waxuu sheegay in loo baahanyahay in mashaariicda horumarineed la wada gaarsiiyo dhammaan dalka oo dhan si ay uga qeybqaataan soo celitna amniga iyo wada noolaashaha shacabka soomaaliyeed.

